

King County


Laanta Fulinta WAQOOYI DHAB AH & QIIMAH

**Kadhigista King County bulsho soodhaweyn leh
halkaas oo uu qofkasta ku baraari karo.**



Waxaan nahay hal koox

- Waxaan marka hore hormarinaa danta kooxda.
- Waxaan si fiican ula shaqeynaa dadka kale si aan shaqada uqabano oo aanu u gaarno yoolalka Degmada.
- Waxaan qadarinaa wax maqlida, raaditaanka aragtiyo kala duwan, iyo kaqeybgelinta dadka kale si aan u tijaabino fikradaheena..
- Waxaan u qaadanaa wanaag ujeedooyinka dadka kale.
- Waxaan nahay dad daacad ah, toosan, oo si firfircoona u wadaaga macluumaadka.



Waxaan xallinaa mashaakilaadka

- Waxaanu kadhignaa mashaakilaadka kuwa muuqda wawaanaa ula dhaqanaa sidii fursado.
- Waxaan aqbalnaa xogta, falanqaynta, iyo sayniska.
- Waxaanu cusbooneysiinaa oo aan tijaabinaa sida ay wax u socdaan.
- Waxaan xalalka ku waafajinnaa mudnaanta istaraatijiga ah, yoolalka, iyo ujeedooyinka.



Waxaan diiradda saarnaa macmiilka

- Waxaan si joogta ah aragti ugu raadinaa baahiyaha macmiilka.
- Waxaan aqoonsanaa fursadaha wawaana marwalba iskudaynaa inaan hagaajino oo shakhsiyadeyno waaya-aragnimada macmiilka.
- Waxaan kula macaamilnaa si ixtiraam, qadarin, iyo degenaan leh.



Waxaa naga go'an natiijo gaarista

- Waxaan u hawlgalnaa si degdeg ah, dadaal, iyo adkaysi leh.
- Waxaanu aqbalnaa masuuliyadda waxaana la xisaabtameynaa nafteena iyo kuwa kaleba.
- Waxaan u hor-marnaa oo aan wax ka qabanna shaqooyinka adag.
- Waxaanu hagaajinnaa hanakeenna waxaana si fiican u baranna faahfaahinta.



Waxaan nahay kuwo isir ahaan cadaalad ah

- Waxaanu garawsanahay cunsuriyada iyo dulmiga waxaana dooneynaa inaan ka baabi'ino heer kasta.
- Waxaanu aqoonsanahay booska awoodeena iyo sida uu saameyn ugu leeyahay la macaamilkeena dadka kale iyo bulshooyinka aan u adeegno.
- Waxaanu u hawlgaleynaa sidi aan hormuud ugu noqon lahayn sidii loo gaari lahaa caddaalada isirk.



Waxaanu ixtiraamnaa dadka oo dhan

- Waxaan si firfircoona u raadinaa inaan barano oo aan fahamno dhammaan aragtiyaha, aaminsanaanta, iyo qiyamka dadka kale.
- Waxaanu dhammaan dadka kaqeybgelinaa go'aanada iyaga saameynta ku leh.
- Waxaanu u aqoonsanaa dadka oo dhan waxqabadkooda iyo guulo-gaaristooda.



Waxaanu u qabanaa hoggaanka

- Waxaanu raadinaa inaan fahano sawirka guud oo aanu u fikirno si hal-abuur leh.
- Waxaanu wax kula xiriirnaa si hufan oo damiir leh.
- Waxaanu u doodnaa oo aan horumarinaa mudnaanta ururka.
- Waxaan ku dhaqanaa xukmin iyo go'aan qaadasho adag.
- Waxaanu ku dhiirigelinaa dadka kale.



Waxeynu nahay wakiillo xooggan

- Waxaan ugu dhaqanaa kheyraadkeena si masuuliyad leh, waxaanu ilaalinna oo wax kusoo kordhinaa waxyabaha gobolkan kadhigaya mid gaar ah.
- Waxaanu muujinnaa karti dhaqaale iyo ka-go'naanshaha xakameynta kharashaadka.